

## Liisto-hubineedda Codsiga Meelaynta Aan Shatiga Lahayn Unlicensed Placement Application Checklist

- Codsiga Daraasada Guriga Qoyska DSHS 10-354:** Gebi ahaan buuxi waxaadna ku dartaa macluumaadka xiriirka ee **saddex** tixraacyo oo ay ka mid yihiin cinwaannada boostada iyo lambarada telefoonka. Laba tixraacyo waa in aysan isla dhalan waxaadna qortaa liiska dhammaan carruurta qaangaarka ah. Qoraha daraasada gurigaaga ayaa la xiriiri doona tixraacyadaada.
- Oggolaanshaha Aasaaska ah (BAF), DSHS 09-653:** Qof kastoo jira 16 sano ama da' ka weyn ee ku nool dhismaha waa in uu soo gudbiyo BAF waana in uu bixiyo aqoonsi sawir leh. **Qaybta 2** ee ku saabsan BAF waa in gebi ahaan la buuxiyo. Marka BAF la helo, shakhsiyaadka 18 sano jirka ah, ama ka weyn waxay sidoo kale heli doonaan waraaq ay ku qoran yihiin tilmaamo ku saabsan sida loo qabsado ballanta sawirka faraha.
- Hubinta Dayacaadda iyo Xadgudubka Ilmaha ee Gobolka Dibadiisa Ka Dhaca, DSHS 15-460:** Fadlan u dhammeystir qof kastoo soo gudbinaya BAF.
- Qorshaha Qaxinta Xaaladaha Degdegga Ah DSHS, 16-204:** Fadlan dhammeystir ka-dibna saxiix.
- Xaashida Maaliyadeed, DSHS 14-452:** Fadlan ku soo lifaaq xaqiijinta dakhliga (tus. W-2s, gunta jeegga mushaharka, iwm.).
- Warbixinta Caafimaadka ee Codsadaha, DSHS 13-001:** Baaritaan jireed oo la dhammeystiray 12kii bilood ee ugu dambeeyay gudahooda ayaa looga baahan yahay codsade kasta. Fadlan ku qor xarafka hore ee magacaaga ka-dibna saxiix qaybta kore ee foomka, waxaadna siisaa bixiyahaaga caafimaad si uu u soo dhammeystiro ka-dibna si toos ah dib ugu soo diro shaqaalaha daraasada gurigaaga.
- Taariikhda Iskaashiga Guriga / Guurka, DSHS 09-979:** Oo ay ka mid yihiin wareegtooyinka guurka iyo/ama furiinka.
- Macluumaadka Shakhsi, DSHS 15-276:** Looga baahan yahay codsade kasta.
- Nuqulka Shatiyada Daraawalka iyo Caymiska Gaariga:** Bixi nuqullada hadda ee loogu talagalay codsade kasta.
- Tallaalada Tdap ama DTap (Xiiqdheer) ee hadda ee loogu talagalay dhammaan xubnaha reerka haddii la codsanayo in ay bixiyaan daryeelka loogu talagalay carruurta ay da'doodu ka yar tahay da'da laba sano.**

### QORAALO:

- Foomamka kor lagu qorey waxaa sidoo kale laga heli karaa <http://www.dshs.wa.gov/fsa/forms>. Waxaad u baahan doontaa in aad geliso lambarka foomka si aad u soo dejiso oo aadna u daabacdo foom kasta. Ha gelin "DSHS" (tus. geli 10-354 goobta laga baaro Lambarka Foomka). **Fadlan hayso nuqulka diiwaanadaada.**
- Xirmadan waxaa ku jira **Baarista Bedqabka Reerka ee loogu talagalay Meelaynta Aan Shatiga Lahayn DSHS 10-453**. Fadlan adeegso liisto-hubineedan si ay kaaga caawiso in aad gurigaaga u diyaariso baarista. **Shaqaalaha daraasada guriga** ayaa dhammeystiri doona foomkan inta lagu guda jirro booqashadooda guriga.
- Soo gudbinta dokumeentigaaga oo dhan hal mar waxaa ay gacan ka geysanaysaa hannaanka in uu si dhakhso ah oo wax-ku-ool ah u socdo.
- Haddii aad jeclaan lahayd in lagaa caawiyo hannaana daraasada guriga, fadlan la xiriir qoraha daraasada gurigaaga ama xiriiriyaha/la-taliyaha.

**Waad ku mahadsantahay danaynta aad danaynaysid in aad noqoto Khayraad Meelayn.** Si aad wax badan uga oggaato hannaanka daraasada guriga ama si lagaaga caawiyo su'aalaha daraasada guriga fadlan la xiriir:

- Fostering Together lambarka 1-866-958-KIDS (5437) loogu talagalay dadka deggan galbeedka Washington ama
- Fostering Washington lambarka 1-877-620-5748 loogu talagalay dadka deggan bariga Washington.
- Hay'adahan waxay bixiyaan taageerada iyo adeegyada la xiriira iyo khayraadyo meelayn kale oo ku habboon.